



## WAR-SAXAAFADEED

### Ka digis talo-maroori iyo ku xadgudubka Dastuurka Dalka.

Tixraac: PDF/02123

May 29, 2023

**Golaha Qurbajoogta Puntland – Puntland Diaspora Forum (PDF)** wuxuu aad u cambaaraynayaa qaraarkii ka soo baxay shirkii ay isugu yimaadeen Madaxweyne Xassan Sheekh iyo qaar ka mid ah madaxda dowladaha xubnaha ka ah Federaalka ee wakhtigoodu dhamaaday. Waxaa cajiib ah in dhamaan masuuliyiintii qaraarkaan soo saaray ay akhriyeen khudbado isku wada mid ah oo xambaarsan hal fariin, taas oo ay uga gon-leeyihiin sidii ay shacabka Soomaaliyeed uga iibiyaan qaraarkan sharci darro, uguna ridi lahayeen indho-sarcaad si aysan shacabku u dhuuxin khatarta qaraarkani xambaarsan yahay.

Waxaa madaxdani ku sheegeen in qaraarkaani yahay awood daadajin iyo inay doonayaan in masiirkii dalka shacabka dib ugu soo celiyaan. Nasiib daro, markaad eegto qodabada qaraarkan waxaad arki in ay yihiin awood maroori iyo xad-gudub dastuur, taasoo ka hor imanaysa waxa ay madaxdaani inoo sheegayaan, sida:

- **In Madaxda Dowlad-Goboleedyadu ku darsi sharci daro oo labo sano ah iyagu isku sameeyeen.** *Qodabkani wuxuu ka hor imanaya dastuurka u degan dowlad-goboleedyada.*
- **Inay xisbiyadii badnaa ee dalka ku soo koobeen labo keliya.** *Qodabkani wuxuu ka hor imanayaa dastuurka dalka qodobadiisa; 16aad, 22aad, 46aad, 47aad, 120-aad iyo 121-aad.*
- **In doorkii Ra'iisal Wasaaraha oo uu horay u ugu xadgudbay Madaxweyne Xassan hadana meesha ka saaray, rabanna inuu ku bedelo wax uu ugu yeeray Madaxweyne ku xigeen.** *Qodabkani wuxuu ka hor imanayaa dastuurka dalka qodobadiisa; 87aad, 97aad, 98aad, 99aad iyo 100-aad.*
- **In Maqaamka Caasimada oo aan weli heshiis laga gaarin ay go'aamo keligood ka gaareen.** *Qodabkani wuxuu ka hor imanayaa dastuurka dalka qodobkiisa 9aad.*
- **In ay ku xad gudbeen jadwalka doorashooyinka dowladaha xubnaha ka ah Federaalka oo ku qeexan dastuurka dowlad goboleedyadaas.** *Qodabkani wuxuu ka hor imanayaa dastuurka dalka qodobadiisa: 48aad, 50aad, 51aad iyo 54aad.*
- **Inay maamulka doorashooyinka, deegaan doorashada, haanaanka doorashooyinka dalka ee Dawlad Goboleedyada iyo Federaalka ay ku xadgubeen.** *Qodabkani wuxuu ka hor imanayaa dastuurka dalka qodobadiisa; 60aad, 61aad, 63aad, 64aad, 69aad, 71aad, 72aad, 79aad iyo 91aad.*



### **Gollaha Qurbajoota Putland waxay aaminsan yihiin:**

- In qodabadii ku qornaa qaraarkaani ay dhaawac weyn ku yihiin dib u hanashada qaranimadii dhuntay, dib u heshiisiinta bulsho iyo geedi socodkii dowladnimada Soomaaliyeed.
- In qaraarkani meel ka dhac ku yahay dastuurka qabyo-qoraal ee dalka iyo dastuurrada u degan Dowlad-Goboleedyada.
- In qaraarkani ku xadgudbay kala saarista awoodaha dalka iyo awood qaybsiga.

### **Gollaha Qurbajoogta Puntland waxay soo jeedinayaan:**

- in Madaxweyne Xassan Sheekh uu ka waantoobo dhaqanka keligii talisnimo iyo ku xadgudubka Dastuurka Dalka iyo faragelinta qaawan ee uu ku hayo maamulada Dowlad Goboleedyada.
- Waxaan Shacabka Soomaliyeed u sheegaynaa in ay ka warhayaan, indho dheer ahna ku eegan, akhriyaanna dastuurka dalku leeyahay si looga hortago xukun kalitalisnimo iyo xadgudubka Dastuurka Dalka.
- Waxaan Xubnaha Barlamaanka labada golle ku dhiirinaynaa inay gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah ee ka saaran ilaalinta dastuurka dalka.
- Waxaan Madaxda Puntland kula talinaynaa inay hore u sii wadaan geedi socodka dowlad-daadajinta iyo doorashooyinka axsaabta badan, si ay ummadda Soomaaliyeed tusaale ku dayasho mudan ugu noqdaan, sidoo kalena ay gutaan doorkooda kaga aadan difaaca dastuurka dalka iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed.
- Waxaan beesha caalamka u sheegaynaa in dadaalkii, taageeradii iyo hiilkii ay dalka iyo dadka Soomaaliyeed la garab taagnaayeen mudada dheer uu noqon doono mid khasaaro ah, hadaysan mawaaqif cad-cad ka istaagin khatarta cusub ee qaraarkaani u horseedi doono Soomaaliya.

***Guddiga Isgaarsiinta & Xiriirka Bulshada - [info@puntlanddiasporaforum.org](mailto:info@puntlanddiasporaforum.org)***